# Corona



## Yaa loogu talinayaa tallaalka looga hortago fayraska korona?

- 75 sano jirka ama ka da`wayn
- Carruurta iyo dadka waaweyn ee da'dooda u dhaxayso 18 ilaa 74 sano oona ka tirsan kooxaha cudurka halis u yahay
- Xitaa dadka caafimaadka qaba oo da`dooda u dhaxayso 65–74 sano waxay qiimo jaban ku heli karaan tallaalka looga hortago waa haddii ay rabaan

Dhakhtarkaaga la xiriir haddii aadan hubin in tani ay khusayso adiga ama ilmahaaga.

## Sidee ayuu tallaalka korona u shaqeeyaa?

- Tallaalka wuxuu jirka baraa sidii u fayraska korona isaga difaaci lahaa.
- Tallaalka waxaa lagu dura cududa sare.
  Waxaa layska tallaala karaa isla waqtiga tallaalka influensada iyo bakteeriga pneumococci.
- Waxtarkiisa wuxuu qaataa 1 ilaa 2 toddobaad.

## Tallaalka kadib maxaa dhici doono?

- Dadka intooda badan waxay xannuun yar ka dareemaan meesha la duray, waxaana laga yaabaa in inyar soo guduudato oo soo bararto.
- Qaar kalena waxay dareemaan qandho, muruq-xannuun, waxay dareemaan oo kale jirro yar ama daal. Calaamadahaas dhowr maalmood ka dib way ciribtirmaan.
- Haddii aadan hubin in calaamadaha aynan u sabab ahayn tallaalka iyo in kale kala xiriirtaa dhakhtarkaaga.

Warbixin faahfaahsan ka akhriso barta internetka fhi.no/voksenvaksinasjon

FHI